

PSPS: Jadwal-waqtiiyeedka

Haddii xaaladaha cimilada ee aadka u daran ay sababaan in la sameeyo PSPS, shantan marxaladood ayaa kaa caawinaya inaad fahamto waxa la filan karo.

1

Waxaan isku diyaarinayaa

koronto demin macquul ah oo sanadka oo dhan ah

2

Waxaa la i siiyey ogeysiis ah

in korontadayda laga yaabo in la demiyoo

3

Waxaan demiyey korontadayda

si aan gacan uga gaysto xaqiijinta badbaadadayda iyo badbaadada bulshada

4

Waxaan sugayaa korontadayda inay soo laabato

kadib marka ay PGE ay baaritaan ku sameeyaan fiilooyinka oo ay dayactiraan wixii waxyeello ah

5

Waxaan ku faraxsanahay in korontadayda ay soo laabatay

waxaana sii wadaa inaan tafatir ku sameeyo qorshahayga u diyaargarowga ee marka xigta

La socio wararka

La Taliyaasheena Adeegga Macaamiisha waxay kugu caawin karaan in ka badan 200 oo luuqadood.

معلومات متوفرة بلغتك

သင့်ဘာသာစကားဖြင့် အချက်အလက်

以您母语提供的信息

以您母語提供的資訊

اطلاعات به زبان شما

情報を見る

사용자 언어로 정보 확인

Tuáñir zuban ot mazé maaluma

Informații în limba dvs.

Информация на вашем языке

Macluumaad Kuqoran Luuqadaada

Información en su idioma

Taarifa katika Lugha Yako


Booqo portlandgeneral.com/wildfireoutages si aad u ogaato xog badan ama naga soo wac **503-228-6322** si aad u hesho xogtii ugu danbeysay.



Waa xiligii dabku kici jiray.

Ma diyaargarowday?

U diyaarsanaanta maqnaanshaha korontada sanadka oo dhan waa fikrad wanaagsan. Annagu waan isdiyaarinaynaa waxaana kugula talinaynaa inaad adigana sidaas samayso.



Waa maxay Daminta Korontada Badbaadada Dadweynaha?

Haddii xaaladaha cimilada ee aad u daran ay khatar geliyaan awoodeena ah inaan si ammaan leh uga shaqeyno qalabyada korontada, waxaaa laga yaabaa inaan ka daminno korontada. Tallaabadan ammaanka lagu ilaalinayo waxaa loo yaqaanaa Daminta Korontada ee Badbaadada Dadweynaha, ama PSPS.

Waxaan tixgelinaa arrimo badan marka aan go'aansaneyno in PSPS ay lagama maarmaan tahay iyo in kale, oo ay ku jiraan:



Dabaylo badan



Heerarka qoyaanka hawada ee hooseeya



Dhirta qallalan



Kormeerada waqtiga-dhabta ah ee ka yimid goobta



Heerkulka



Astaamaha Digniinta



La shaqeynta hay'adaha maxalliga ah, kuwa dawladda iyo kuwa gobolka

Sababtoo ah Daminta Korontada Badbaadada Dadweynaha waxay socon kartaa maalmo badan, waxaa muhiim ah inaan dhammaanteen diyaar u nahay oo aad leedahay qorsha degdeg ah oo kuu meeleysan.

Sida aan ugu diyaargarowno dabka duurka sanadka oo dhan

Waxaan sameynaa taxadaro dheeraad ah si aan u ilaalino dadka, hantida iyo deegaanka dabiiciga ah. Sannad kasta, waxaanu eegnaa aagaggeena adeegyada waxaanu qiimaynaa baahida loo qabo jaritaanka hormarsan ee geedaha iyo qashinka. Waxaan isbadel ama casriyeyn ku sameynaa qalabka muhiimka ah si loo kordhiyo iska caabbinta dabka oo loo yareeyo khatarta gubashada.

Halkaan waxaa ku qoran waxyaabaha aad filan karto

Haddii aan u baahanahay in aan shidno PSPS, waxaanu ka shaqaynaa in aanu yareyno tirada dadka ay saamaysay iyo dheererka muddada koronto la'aanta.

WAXAA LA IDINLA SOCODSIIN DOONAA WIXII XOG AH

Ka hor, inta lagu jiro iyo ka dib PSPS, waxaan ku siin doonaa macluumaad iyo aqbaaraad ku saabsan waxa siyaabo badan u dhacaya. Xaqiiji inaad cusboonaysiiso macluumaadkaaga xiriirka ee ku jira mareegta ama barnaamijka PGE si aanu kuula xiriirno.

TAAGEERIDDA BULSHADEENA

Inta lagu guda jiro PSPS, waxaanu u samayn doonaa Xarumaheena Kheyraadka Bulshada si ay u bixiyaan macluumaad, biyo, baraf, dabaynta agabyada elektarooniga ah iyo helitaanka Wi-Fi.

DIB UGU SOO CELINTA KORONTADAADA SI BADQAB AH

Marka ay badbaado tahay in sidaa la sameeyo, shaqaalaheena waxay si muuqaal ah u baaraan khadadkeena iyo qalabkeena mayl-ilaa-mayl si loo helo dhaawaca oo ayna u sameeyaan dayactirada lagama maarmaanka ah, ayagoo u shaqeynaya sida ugu dhakhsaha badan ee badbaadadu u ogolaato dib u soo celinta korontada. Fiiri sawiradeena qaybta danbe ku yaala si aad u aragto tallaabooyinka aanu qaadno si aan korontadaada si badbaado ah dib kuugu soo-celino.

Waxaad xog dheeraad ah ka heli kartaa barta portlandgeneral.com/wildfire

Tillaabooyinka ay tahay inaad qaado si aad u diyaargarowdo

Iyada oo ay kuxiran tahay xaaladaha cimilada iyo waxyaabaha kale ee saameyn karo, Daminta Korontada ee Badbaadada Dadweynaha (PSPS) waxay socon kartaa maalmo badan. Waxaan kugula talinaynaa inaad sheeyaasha/alaabta ku keydsato weelal aan biyaha iyo cayayaanka aanan geli karin iyo inaad dib u buuxiso, wixii loo baahdo, ugu yaraan hal mar sanadkii.

1

LA SOCO

cusboonaysiiso macluumaadkaaga xiriirka si aan kuugu soo wargelino wixii soo kordha.



2

SAMEYSO AGABKA OOGA MAARMEYSO KORONTO GO'NAASHAHA


Xaqiiji in qof kasta oo gurigaaga jooga uu ogyahay meesha laga helaayo.



3

QORSHO SAMEYSO

Ilaali badbaadada qoyskaaga iyo gurigaaga inta lagu jiro koronto go'a/koronto la'aanta.



Qaar kamid ah agabka aasaasiga ah ee lagu daro:

- Lambarrada taleefanka xaalada degdega ah, ayna ku jiraan Adeegga Macaamiisha PGE: 503-228-6322. **La taliyaasheena adeegga macaamiisha waxay kugu caawin karaan 200+ oo luuqadood.**
- Tooshka ama madaxyada nalka
- Raadiyaha ku shaqeeya batariga ama kuwa gacan qabsiga
- Bateriyada dheeraadka ah (gaar ahaan kuwa loogu talagalay haamaha hawada oksijiinta ama qalabka kale ee caafimaadka)
- Jaajarada qalabka korontada, oo ay ku jiraan jaajarada gawaarida
- Biyo, hal gallon qofkiiba maalin walba, gaar ahaan haddii aad ku tiirsan tahay bamka korontada ku shaqeeya ee biyaha
- Baakadaha kujira barafka fadhiya ama bacaha/dhallooyinka cuntada iyo daawada qabow lagu keydsado ilaa aad baraf kaheli karto
- Cuntooyinka muddo ooli kara iyo qalabka qasacadaha lagu furo, kirliyada, birtaawo iyo maacuun
- Qaboojiye la qaadi karo
- Ciyaaraha miiska, buugaag iyo turub
- Foornada cunto ku karinta banaanka, gaaska foornada, oo ay kujiraan shidaal iyo qarxisada lagu daaro ama taraq

- Xili hore qorshayso inaad u gurto saaxiibadaa, ehelkaaga ama hooygaaga, gaar ahaan haddii aad qabto xaalad caafimaad oo u baahan koronto ama haddii aad u baahan tahay inaad shaqayso ama wax ku barato guriga inta korontadu maqan tahay.
- Qorshayso baahiyaha caafimaadka si aad wali koronto ugu hesho qalabka inta lagu jiro koronto go'a oo aadna ka fakarto inaad iska diiwaan geliso Barnaamijkeena Medical Certificate program (Shahaadada Caafimaadka). Tani waxay naga caawinaysaa inaan xili hore kulasoo xariirno si aan kuugu sheegno koronto maqnaanshaha. Booqo portlandgeneral.com/medical ama wac 503-612-3838 si aad xog badan uga hesho barnaamijka.
- Iskuday inaad iibsato matoor kayd ah aadna raacdo tilmaamaha shirkada samaysay si aad qaab amaan ah ugu isticmaasho.
- Qorshayso quudinta iyo biyo siinta xayawaannada rabaayada ah ama xoolaha haddii aad ku tiirsan tahay bamka korontada ku shaqeeya ee biyaha.
- Xog dheeraad ah ka hel websaydka degmadaada ama **National Fire Protection Association (Ururka Qaranka ee Kahortaga Dabka)**, hay'adda **Red Cross (Laan-qayrta Cas)** iyo **Ready.gov**.

KA CAAWI BATTERIGA AALADAADA IN UU WAARO MUDDO:

- Ha damin – tableet-kaaga ama taleefankaaga ayaa isticmaala dab badan markii la damiyo oo hadana la shido, sidaas darteed taas badalkeeda isticmaal habka hurdada ee "sleep mode".
- Iska xir Bluetooth-ka iyo ogeysiisyada aadan ubaahneyn (furo ogeysiisyada gurmada degdega).
- Iska dami Wi-Fi marki aan la isticmaaleyn.
- Yaree iftiinka shaashada sida ugu hooseyso ee macquulka ah.
- Iska xir ablikeeshinada markii aad bogto isticmaalkooda.

Tallooyin la xiriira diyaargarowga oo dheeraad ah ka hel barta portlandgeneral.com/prepare